# OGEYSIISKA WADAJIRA EE DHAQAMADA ASTURNAANTA

## OGAYSIISKANI WUXUU SHARRAXAYAA SIDDA LOO ISTICMAALI KARO AMA LOO BIXIN KARO MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAAD, IYO SIDDA AAD U HELI KARTO MACLUUMAADKAAS—FADLAN SI TAXADAR LEH U AKHRI.

Ogaysiiskani wuxuu u taagan yahay ogeysiis wadajira ahaana kaas oo loogu talagalay isbitaallada, xarumaha, iyo bixiyeyaasha adeegga ee xiriirka la leh BJC Health iyo Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington (kuwaas oo halkan ka dib loogu yeeri doono “annaga”), kaas oo ku saabsan habraacyadeena asturnaanta macluumaadka caafimaadka la xiriira. Waxaanu dejinay hal ama ka badan oo daryeelka caafimaadka nidaamsan loo qaabeeyo. Dhammaan xarumahayagu kama wada qaybqaataan mid kasta oo ka mid ah abaabulada daryeelka caafimaad ee nidaamsan. Gaar ahaan, dhammaan isbitaallada iyo bixiyeyaasha adeegga ee xiriirka la leh BJC Health waxay ka wada qaybqaataan hal nidaam dayreel oo abaabulan ; abaabul kale oo ah daryeel caafimaad oo nidaamsan, qayb ka mid ah isbitaallada iyo bixiyeyaasha BJC Health ayaa kala qaybqaata Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington. Tani waxay ka dhigan tahay in macluumaadkaaga caafimaad lala wadaagi karo ka-qaybgalayaasha heshiisyadan si ay ugu wada shaqeeyaan nidaamyo caafimaad oo isku dhafan, oo ay ku jiraan daaweyn, lacag-bixin, iyo hawlo kale oo daryeel caafimaad sida dib-u-eegis wadajir ah, xaqiijinta aqoonsiyada, waxbarasho, maareynta khataraha, badbaadada bukaanka, iyo qiimeynta iyo horumarinta tayada. Macluumaadka dheeraadka ah ee heshiisyada daryeelka caafimaadka waxa laga heli karaa siyaasadaha BJC Health ee ku jira BJC.org/patients-visitors/our-policies.

Waxaanu raaci doonaa shuruudaha Ogeysiiskan markaanu isla wadaagayno ama shaacinayno macluumaadka caafimaad ama la wadaagayno dhinacyo saddexaad. Maadaama aanu macluumaadka caafimaadka si gaar ah u hayno, si gaargaar ah ayaanu uga jawaabi doonaa su'aalahaaga, codsiyada, iyo cabashooyinka la xiriira macluumaadka caafimaadka.

## WAAJIBAADKEENA KHUSEEYA MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA

Sharciga wuxu nagu waajibinaya inaanu ilaalino macluumaadkaaga caafimaad ee ilaashan, kugu wargelino waajibaadyada sharcigaas, iyo inaanu kugu wargelino ka dib marka uu yimaado xadgudub ka dhan ah macluumaadkaaga caafimaad ee ilaashan oo aan la xafidin. Ogeysiiskani wuxuu sharxayaa sida, goorta, iyo sababta aan caadi ahaan u isticmaalno oo u shaacino macluumaadka caafimaadka, iyo xuquuqdaada asturnaaneed ee ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad. Ogeysiiskeena, isticmaalkeena iyo shaacinteena macluumaadka caafimaadka waxaan ugu wacnaa "Habraacyada Asturnaanta." Macluumaadka caafimaad ee ilaashan guud ahaan waxa uu ka kooban yahay macluumaad aan abuurno ama aan helno oo ku aqoonsanaya adiga iyo xaaladdaada caafimaad ee hore, hadda, ama mustaqbalka, ama daryeelka lagu siiyay ama bixinta lacagaha daryeelkaas caafimaad. Waxaa waajib nagu ah in aan u hoggaansanno Habraacyadan Asturnaanta laga bilaabo taariikhda dhaqan-galka ee hoos lagu xusay.

## YAA RAACAYA OGEYSIISKAN

Ogeysiiskayagu wuxuu u taagan yahay Ogeysiis Wadajir ahaan, oo waanu raaci doonnaa shuruudaha ku xusan Ogeysiiskan. Ogeysiiskani wuxu sharraxayaa Habraacyada Asturnaanta BJC Health iyo shirkadaha hoos yimaada ee ay wada leedahay iyo xarumaha xulafada la ah iyo shaqalaaha ("goobaha BJC la xulafada ah") ee ku xusan liiska ku jira BJC.org/patients-visitors/patient-privacy, Habraacyada Asturnaanta Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington iyo ururada hoos yimaada ee ay wada leedahay iyo xarumaha xulafada la ah iyo shaqaalaha. "Shaqaalaha" waxaa ku jira xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha caadiga ah, iyo mutadawiciinta ka tirsan hay'adaha iyo xarumaha uu khuseeyo Ogeysiiskan.

## ISBEDDELADA KU YIMAADDA OGEYSIISKAN

Xuquuqda beddelista Habraacyadeena Asturnaanta iyo shuruudaha Ogeysiiskan annagaa iska leh. Haddii aan isbeddel muhiima ku sameyno Ogeysiiskan, waanu ku siin doonaa Ogeysiiska wax laga beddelay annagoo kuu soo bandhigi doona markaad codsato soona dhigi doona bogaga adeegeena. Ogeysiiska wax laga beddelay waxaanu sidoo kale soo dhigi doonaa websaydyadeena. Isbeddel kasta oo aanu ku sameyno Habraacyadeena Asturnaanta wuxu saameyn doonaa macluumaad kasta oo caafimaad oo ilaashan oo aanu hayno.

## SIDA AAN U ISTICMAALI KARNO UUNA BIXIN KARNO XOGTAADA CAAFIMAAD ADIGA OO AAN OGOLAANSHO QORAAL AH BIXIN

### Hawlaha Daawaynta, Lacagbixinta, iyo Daryeelka Caafimaadka Dartood

• **Daawayntaada Darteed** Waxaan u isticmaali karnaa oo/ama u siin karnaa xogtaada caafimaad bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha kale ee ku lug leh daryeelkaaga, kuwaas oo ku siin doona daaweyn ama adeegyo caafimaad. Tusaale ahaan, haddii lagugu sameeyay qaliin ama aad hadda ilmo dhashay, waxaan la xiriiri karnaa hay'ad daryeelka caafimaadka guriga si aan u soo agaasino adeegyo laguugu qabanayo gurigaaga ama aan u hubino soo kabashadaada ka dib marka lagaa saaro isbitaalka.

• **Bixinta Lacagaha Adeegyada Caafimaadka** Waxaan u isticmaali karnaa ama u bixin karnaa xogtaada caafimaad si aan biil u soo dallacno una u helno lacagbixinta adeegyada aad naga heshid. Tusaale ahaan, waxaan xogtaada caafimaad siin karnaa qaybtayada biilasha ama sheegashooyinka si loo diyaariyo biil ama bayaan loo dirayoo adiga, shirkaddaada caymiska, oo ay ku jiraan Medicare ama Medicaid, ama koox kale ama shakhsi kale oo mas'uul ka noqon kara bixinta lacagta adeegyadaada caafimaadka.

• **Hawlaheena Daryeelka Caafimaadka dartood** Waxaan u isticmaali karnaa ama u bixin karnaa xogtaada caafimaad si aan u fulino hawlo maamul, maaliyadeed, sharciyeed, iyo tayeyn kuwaas oo lagama maarmaan u ah socodsiinta ganacsigeena iyo taageeridda hawlahayaga daaweynta iyo lacag-bixinta. Tusaale ahaan, waxaan u isticmaali karnaa ama u bixin karnaa xogtaada caafimaad si aan gacan uga gaysano qiimeynta tayada iyo waxqabadka dhakhaatiirtayada iyo shaqaalahayaga, iyo si aan u horumarino adeegyada aan bixino. Gaar ahaan, waxaan u gudbin karnaa xogtaada caafimaad dhakhaatiirta, xirfadlayaasha caafimaadka, ama kuwa kale ee caafimaadka ama ganacsiga si dib-u-eegis, latashi, barbardhig, iyo qorsheyn loogu sameeyo Waxaan u isticmaali karnaa una shaacin karnaa xogtaada caafimaad inta lagu guda jiro barnaamijyadayada tababarka sababo la xiriira aqoonsasho, shahaado siinta, bixinta Shatiga, ama hawlaha xaqiijinta aqoonta xirfadeed. Intaas waxaa dheer, waxaan u gudbin karnaa xogtaada caafimaad hanti-dhawrayaasha, xisaabiyeyaasha, qareennada, xakameeyayaasha dawladda, ama la-taliyayaasha kale si ay u qiimeeyaan uuna u xaqiijiyaan u hoggaansanaantayada shuruucda ama si ay noogu metelaan goobaha xakamaynta iyo sharciyada, hay'adaha kale ee dawliga ah, ama waaxaha garsoorka.

### Hawlaha Shuruucda Ogoshahay ama Waajibiyay Darteed

Waxaa jira xaalado uu Xeerka Wareejinta iyo Isla-xisaabtanka Caymiska Caafimaadka (Health Insurance Portability and Accountability Act, HIPAA) uu noo oggolaanayo inaan isticmaalno iyo/ama aan bixinno macluumaadkaaga caafimaad annagoo marka hore kaa helin ogolaansho qoran, ujeedooyin aan ahayn daaweyn, lacag-bixin, ama hawlgallada daryeelka caafimaadka dartood. Marka laga reebo xaaladaha gaarka ah ee ay sharcigu naga rabaan inaan isticmaalno ama aan bixinno macluumaadka (sida u gudbinta ilmaha dhasha waaxda caafimaadka ama soo gudbinta xadgudubka ama dayacaadda ee adeegyada bulshada), waxaan qaybtan ku liisgareynay dhammaan isticmaalka iyo bixinta macluumaadka ee uu oggol yahay xeerka HIPAA. Waa inaan buuxino shuruudo badan oo ku jira sharciga ka hor inta aanan macluumaadkaaga cid la wadaagin sababahaas darteed. Wixii macluumaad dheeraada ah ka fiiri hhs.gov/hipaa/for-individuals/guidance-materials-for-consumers/index.html.

**1. Hawlaha Caafimaadka Dadwaynaha** Macluumaadkaaga caafimaadka waxa loo wadaagi karaa sababo la xiriira caafimaadka dadwaynaha, sida:

- in loo gudbiyo hay'ad caafimaadka dadweynaha oo sharcigu u oggolaaday inay ururiso ama ay hesho macluumaadka si ay uga warbixiso, cudurrada la kala qaado iyo xadgudubka carruurta, iyo waxyaabo kale oo la mid ah
- in loo gudbiyo Hay'adda Cuntada iyo Dawooyinka ee Maraykanka (FDA) si looga warbixiyo dhacdooyinka la xiriira qalabka caafimaadka ama alaabta
- si looga warbixiyo qof u nugul cudur la kala qaado
- in loo gudbiyo cidda aad u shaqeyso si loo eego inaanu daryeelka u bixinayno qaab waafaqsan tilmaamaha shaqaaleysiiyahaaga marka arrinku la xiriiro dhaawac ganacsi
- in loo gudbiyo dugsigaaga haddii caddayn tallaal la codsado

**2. Si loo soo gudbiyo Tacaddi Qof Wayn ama Dayacaad** Haddii aan aamminsanahay in bukaanku dhibbane u yahay xadgudub, dayacaad, ama rabshadaha qoyska, waxaan ogeysiin karnaa hay'adda dawladda ee sharcigu u oggolaaday inay hesho warbixinnada ku saabsan arrimahaas. Xaaladaha qaarkood, waxa laga yaabaa inaanu ku soo wargelino ka hor inta aanan gudbin walaacyada noocaas ah.

**3. Hawlaha Kormeerka Caafimaadka** Waxaan u gudbin karnaa macluumaadkaaga caafimaad hay'ad kormeerka caafimaadka ee sharcigu u oggolaaday inay kormeerto nidaamka daryeelka caafimaadka iyo sida aan ugu hoggaansanno sharciyada qaarkood.

**4. Hawlaha Sharci Fulinta** Waxaan u bixin karnaa xogtaada caafimaad si looga jawaabo saban maxkamadeed oo ka yimid hay'adaha fulinta sharciga, yeedhmo maxkamadeed, yeedhmo guddi xeerbeegti, codsi maamul, waaran, dalab baaritaan, ama codsi ka yimid sarkaal fulinta sharciga ah oo doonaya xog lagu aqoonsanayo ama lagu helayo dhibbane, tuhmane, qof baxsad ah, marqaati muhiim ah, ama qof la la’yahay (oo ay ku jiraan shakhsiyaadka dhintay), si looga warbixiyo dambi ka dhacay dhismahayaga, ama si looga warbixiyo dambi sababi kara baahi loo qabo adeegyadayada gurmadka degdegga ah. Haddii Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington uu helo sabban ama yeedhmo maxkamadeed, yeedhmo guddi xeerbeegti, codsi maamul, waaran, dalab baaritaan, oo si sharci ah uga dalbanaya Jaamacadda Washington inay bixiso diiwaannadaada caafimaad, Jaamacadda Washington waxay isku dayi doontaa inay ku siiso ogeysiis ka hor intaan xogtaada caafimaad loo gudbin hay’adaha fulinta sharciga, haddii sharcigu u oggolaado Jaamacadda inay sidaas sameyso.

**5. Hannaanada Maxkamadaha iyo Maamulka** Waxaan u bixin karnaa xogtaada caafimaad si looga jawaabo u sabban ama yeedhmo maxkamadeed, amarka guddi maxkamadeed, codsi soo bandhigis marqaatiyo (discovery request), ama hannaanno kale oo sharci ah inta lagu guda jiro dacwadaha garsoorka ama kuwa maamulka. Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington waxay isku dayi doontaa inay ku siiso ogeysiis ka hor intaan xogtaada caafimaad la bixin, ilaa mooyee in ogeysiiskaas uu horey kuugu soo diray dhinac kale oo dacwadda ku jira iyo/ama in dacwadda laga dhex gudbiyay amar maxkamadeed oo xogta ilaalinaya.

**6. Baarayaasha sababaha dhimashada, Baarayasha Caafimaad, iyo Abaabulayaasha Aaska** Waxaan u gudbin karnaa macluumaadkaaga caafimaad baareyaasha sababaha dhimashada, dhakhaatiirta ku takhasusay baaritaanka xaaladaha caafimaad, iyo dadka abaabulaya aaska si loo aqoonsado qof dhintay ama si loo ogaado sababta dhimashada.

**7. Ku Deeqista Xubnaha Jirka** Waxaan u gudbin karnaa macluumaadkaaga caafimaad ururka qaybiyah xubnaha caafimaadka ama xarun kasta oo kale oo ka qaybqaadata ama go'aan ka gaarta soo iibinta, kaydinta, iyo/ama tallaalidda xubnaha ama unugyada jirka.

**8. Ujeedo Cilmibaariseed** Waxaan qabanaa oo aan ka qaybqaadanaa cilmi-baarisyo caafimaad, bulsho, cilmi-nafsi, iyo daraasado noocyo kale ah. Mashaariicda cilmi-baarista badankood ee bini'aadanka khuseeya, oo ay ku jiraan kuwa badan oo adeegsada xogta caafimaadka, waxay maraan hab-raac ansixin gaar ah oo lagu qiimeeyo mashruuca cilmi-baarista ee la soo jeediyay iyo sida loo isticmaalayo xogta caafimaadka. Si kastaba ha ahaatee, xaaladaha qaarkood, waxaan u soo bandhigi karnaa macluumaadka caafimaadka cilmi-baarayaasha isu diyaarinaya inay qabtaan mashruuc cilmi-baaris si looga caawiyo inay go'aamiyaan in mashruuca cilmi-baarista la fulin karo ama uu faa'iido yeelan doono, ilaa inta macluumaadka caafimaadka ay isticmaalayaan uusan ka baxayn dhismahayaga. Waxa laga yaabaa in dhakhaatiirtiinu kuu soo bandhigaan fursad aad kaga qaybgasho tijaabo cilmi-baaris caafimaad

(daaweyn tijaabo ah), sidoo kale cilmi-baarayaasha kale ayaa laga yaabaa inay kula soo xiriiraan si ay u ogaadaan inaad xiisaynayso in aad u qabto ka qaybgalka mashaariicda cilmi-baarista. Ka-qaybgalkaaga mashruuc cilmi-baariseed wuxuu dhici doonaa oo kaliya ka dib marka lagugu wargeliyo cilmi-baarista, aad hesho fursad aad ku weydiiso su'aalo, aadna saxiixdo foomka oggolaanshaha. Marka lagu ansixiyo hab-raac qiimeeyneed oo gaar ah, cilmi-baarista waxaa lagu fulin karaa iyadoo la isticmaalayo macluumaadkaaga caafimaadka iyada oo aan lagaa helin oggolaansho.

**9. In Waxyeelo Qof lagaga Ilaaliyo ama Sugitaanka Badqabka Dadwaynaha** Waxaan bixin karnaa macluumaadkaaga caafimaad haddii aan aamminsanahay in bixintaas ay lagama maarmaan u tahay in laga hortago ama lagu yareeyo khatar weyn ama waxyeello soo gaari karta dadweynaha, ama caafimaadka iyo badqabka qof kale.

**10. Shaqooyinka Dowladda ee Khaaska ah** Waxaan u siidayn karnaa macluumaadkaaga caafimaad baahiyaha gaarka ah ee amniga dawladda, ama hadba sidii looga baahdo xarumaha asluubta ama xabsiyada.

**11. Ujeedooyinka Magdhowga Shaqaalaha Dartood** Waxaan shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan u raacno shuruucda magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyada kale ee la midka ah..

**12. Loo Diro Shuraakada Ganacsi** Waxaan u gudbin karnaa macluumaadkaaga caafimaad "shuraakada ganacsiga", kuwaas oo ah shaqsiyaad ama shirkado noo qabta adeegyo gaar ah. Tusaale ahaan, shuraakada ganacsiga waxaa ku jiri kara shirkadda noo qaabilsan maamulida soo dallacista biilasha sheegashada, shirkadaha na siisa barnaamijka naga caawiya inaan kuu soo dirno xusuusinta ballamaha, iyo bixiyeyaasha kale ee adeegga. Waxa aanu shuraakada ganacsiga ku waajibinaa inay ilaaliyaan oo xafidaan macluumaadkaaga.

**13. Si aan Kuugu soo Wargelino Badeecada iyo Adeegyada Caafimaadka La Xiriira** Waxaan u isticmaali karnaa xogtaada caafimaad inaan kugula soo xiriirno si aan kuu xasuusino ballamahaaga, ama inaan kula wadaagno macluumaad ku saabsan habab kale oo laguu daawayn karo iyo adeegyo caafimaad oo faa'iido kuu leh.

**14. In loo Diro Waalidiinta iyo Masuuliyiinta Carruurta Aan Qaangaarka ahayn** Marka bukaanku yahay ilmo aan weli qaan-gaarin, waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee ilmahaas waalidkiis ama dadka mas'uulka ka ah, ilaa sharcigu diido mooyee.

**15. Ujeedooyinka Dallacista Biilasha iyo Lacag soo Uruurinta** Waxaan u isticmaali karnaa ama u shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaad sidii aan ku heli lahayn lacagbixinta adeegyada aan ku siinay. Waxaa lagugula soo xiriiri karaa boostada ama taleefan kasta oo lagugu yaqaanno, oo ay ku jiraan lambarada taleefanada gacanta. Wicitaannada taleefanka waxaa lagu samayn karaa fariimo cod ah oo horay loo duubay ama kuwa la farsameeyay, iyo/ama aaladda wicitaanka otomaatigga ah (an “autodialer”). Waxaan fariin cod ah kuugu reebi karnaa taleefankaaga, oo ay ku jiraan farriimaha macluumaadka sharcigu waajibinayo (oo ay ka mid yihiin shuruucda dayn uruurinta) iyo/ama kuwa ku saabsan lacagaha kale ee lagaa rabo. Farriimaha qoraalka ah ama iimaylada isticmaalaya cinwaano iimayl oo kasta waxa sidoo kale loo isticmaali karaa in lagugula soo xiriiro.

**16. Ujeedooyinka Lacag-uruurinta** Waxaan isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga xog-dadwayne, oo ay ku jiraan magacyada, cinwaannada, xogta kale ee xiriirka, da'da, lab ama dheddig, iyo taariikhda dhalashada; taariikhaha aad daryeelka caafimaad naga heshay; xogta waaxda adeegga ku siisay; xogta dhakhtarka ku daaweeyay; iyo xogta natiijada si aan kuula soo xiriirno annagoo ururinayna dhaqaale si aan u sii wadno ama u ballaarino adeegyadayada caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay in aadan ogolaan xiriiraradaas la xiriira lacag-uruurinta. Haddii aadan doonayn in laguugu soo daro qofka (dadka) aan la xiriirno marka aan lacagta tabarucaadka ah ururinayno, fadlan la hadal qofka ay magaciisa iyo taleefankiisu ku qoran yihiin qaybta xiriirka ee ogeysiiskan. Haddii aad go'aansato inaan laguula soo xiriirin hawlaha lacag ururinta dartood, go'aankaas marnaba saamayn kuma yeelan doono adeegga caafimaad ee aad naga helayso ama habka lacag-bixintaada.

Fadlan ogow haddii aan helno macluumaad la xiriira baaritaankaaga, saadaasha xaaladdaada, ama daaweynta aad u qaadatid balwadaha ee laga helay barnaamijyada hoos taga 42 Sharciga Xeerka Federaalka (Code of Federal Regulations, CFR) Qaybta 2 (“Diiwaanada Qaybta 2”), ma isticmaali doono mana shaacin doono Diiwaankaaga Qaybta 2, sidoo kale markhaati ahaan uma bixin doono xogtaada ku jirta Diiwaankaaga Qaybta 2, marka ay jirto

dacwad madani ah, mid dambi, mid maamul, ama mid sharci-dejineed oo adiga kaa dhan ah, ilaa aad bixisay oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan shaacintan (oo ka madax bannaan oggolaanshahaaga isticmaalka ama shaacinaha kale), ama amar uu na faro maxkamadeed ka dib markii adiga ama annaga (oo ah cidda rasmiga ah ee haysa Diiwaanada Qaybta 2) nala siiyay ogeysiis iyo fursad aan ku hadalno, sidii ku cad xeerka 42 CFR Qaybta 2. Amarka maxkamada ee oggolaanaya isticmaalka ama shaacinta macluumaadkan waa in uu la socdaa amar maxkamadeed ama shuruudo kale oo sharci ah oo qasbaya shaacinta ka hor inta aan la isticmaalin ama la shaacin macluumaadka la codsaday.

BJC Health waxay halwgeliyaan barnaamij 42 CFR Part 2. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Ogeysiiska Habraacyada Asturnaanta ee barnaamijkan waxa laga helayaa BJCBehavioralHealth.org.

### Marka Doorbidyadaadu Hagayaan Isticmaalkayaga ama Shaacintayada

• Kaydka macluumaadka xarunta waxaa ku jiri kara magacaaga, goobtaada xarunta, xaaladdaada guud sida deggan ama mid dhex-dhexaad ah , iyo diinta aad haysato (haddii aad adigu bixisay xogtaas). Haddi aadan noo sheegin inaad rabto inaan xogtaada lagu darin kaydka macluumaadka xarunta, waxaa lagugu darayaa kaydkaas, waxaana xogtaada lala wadaagi karaa culimada diinta ama dadka magacaaga kugu soo raadiya.

• Waxaan la wadaagi karnaa xogtaada caafimaad xubnaha qoyskaaga, qaraabada kale, saaxiibbada, ama qof kasta oo kale oo aad adigu noo sheegto kaas oo ku lug leh daryeelkaaga ama bixinta kharashka la xiriira daryeelkaaga, ilaa aad noo sheegto
in aanan sidaas sameyn mooyee.

### Isticmaalada iyo Shaacinaha u Baahan Oggolaanshaaga Qoran

• Ma shaacin doono xogta la diyaariyay daawaynaha maskaxeed haddii aadan bixin oggolaansho qoran, marka laga reebo haddii adeegsiga iyo shaacinta macluumaadkaas uu sharcigu oggol yahay ama uu qasbayo qodob sharci ah.

• Ma samayn doono wax shaacin ah oo u dhigma iibinta xogtaada caafimaad haddii aadan bixin oggolaansho qoraal ah. Iibinta xogta caafimaadka ee ilaashan waxay dhacdaa marka annaga, ama qof aan si toos ah ama si dadban heshiis ula galnay, aan helno lacag lagu beddesho xogtaada caafimaad ee la ilaashay.

• Uma isticmaali doono, umana shaacin doono xogtaada caafimaad ee la ilaaliyay ujeeddooyin suuqgeyneed haddii aadan bixin oggolaansho qoraal ah. Suuqgeynta waxaa lagu qeexaa helidda lacag ka timaada dhinac saddexaad si loogu sahlo inay kula soo xiraan oo kuu sheegaan badeecad ama adeeg uu dhinacaas saddexaad bixinayo.

Xaaladaha aan si guud loogu tilmaamin Ogeysiiskeena, waxaanu kaa codsan doonaa oggolaansho qoran ka hor inta aanan isticmaalin ama shaacin xogtaada caafimaad. Oggolanshahaas qoraal ahaan ayaad kula laaban kartaa markasta si aad u joojiso shaacinta xogtaada caafimaad ee mustaqbalka. Macluumaadka horay loo shaaciyay, si kastaba ha ahaatee, lama codsan doono in la soo celiyo, sidoo ka laabashadaadu ma sameynayso tallaabo kasta oo aanu horay u qaadnay annagoo isticmaalayna oggolaanshahaaga. Intaas waxaa dheer, haddii aan macluumaadka u soo ururinnay daraasad cilmi-baariseed, waxaa naloo oggol yahay inaan isticmaalno ama shaacinno macluumaadkaas ilaa xadka ay lagama maarmaanka u tahay in lagu dhowro hufnaanta iyo saxnaanta daraasaddaas.

## XUQUUQAHA LA XIRIIRA MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA

### Codsiga Xaddidaadda Adeegsiyo iyo Shaacino Cayiman ee Macluumaadka Caafimaadka

Waxaad ku codsan kartaa qoraal ahaan in la xaddido habka aan u isticmaalno ama u shaacinno xogtaada caafimaad ee ilaashan marka ay timaaddo daawayntaada, bixinta kharashka adeegyada caafimaad, ama hawlgallada la xiriira shaqada caafimaadka. Waxaad sidoo kale codsan kartaa in la xaddido nooca macluumaadka caafimaadka ee aanu la wadaagi karno qof ku lug leh daryeelkaaga, sida xubin qoyska ah ama saaxiib. Si aad codsi u sameyso, fadlan eeg tilmaamaha ku yaalla dhammaadka Ogeysiiskan.

Waajib naguma aha inaanu kuu aqbalno codsigaaga xaaladaha oo dhan. Intaas waxaa dheer, xaddidaad kasta oo aan ansixinno ma saameyn doonto isticmaalka ama shaacinta nalaga rabo ama naloo oggol yahay in aan u samaynno si waafaqsan sharciga. Waa inaan aqbalnaa codsigaaga xaddididda shaacinta xogtaada caafimaad ee lala

wadaagayo qorshahaaga caymiska caafimaadka, haddii aan shaacintaas sharcigu waajibinayn, iyo haddii xogta aad rabto in la xaddido ay si gaar ah u khusayso keliya adeeg ama agab caafimaad oo adiga (ama qof kale oo ku matalaya, oo aan ahayn caymiskaaga) aad si buuxda u bixiseen kharashkiisa.

### Codsashada Xiriiro Qarsoon oo Sir ah

Waxaad codsan kartaa in isbeddelo lagu sameeyo qaabka aan kuula soo xiriirayno ama goobta aanu kaala soo xiriiri karno. Waa inaad codsigaaga qoraal ku soo gudbiso. Eeg macluumaadka xiriirka ee hoose. Waanu aqbali doonaa codsigaaga macquulka ah, laakiin markaanu go'aaminayno in codsigaagu macquul yahay iyo in kale, waxaanu tixgelin doonaa dhibka maamul ee uu nagu keeni karo.

### Eegista iyo Helista Nuqulada Xogtaada Caafimaadka

Waxaad dalban kartaa inaad fiiriso oo/ama aad nuqul xogtaada caafimaadka ah. Waa inaad codsigaaga qoraal ku soo gudbiso. Si aad u sameyso codsi ku saabsan xogtaada caafimaadka, fadlan eeg tilmaamaha ku yaalla dhammaadka Ogeysiiskan.

Waxa laga yaabaa in aanu khidmad kaa qaadno si aanu kuu koobiyayno ama kuugu diyaarino soo koobidda macluumaadka caafimaadka ee la codsaday. Waxaan kaga soo jawaabi doonaa codsigaaga xogta caafimaadka 30 maalmood gudahood kadib marka aan helno codsigaaga, annagoo bixinayna macluumaadka la codsaday, ama diidayna codsiga oo soo raacinayna sharaxaad qoraal ah oo ku saabsan sababta diidmada, ama kugu ogeysiinayna inaan u baahannahay waqti dheeri ah si aan u dhammaystirno tallaabada aan ka qaadayno codsigaaga (tusaale ahaan, haddii xogtaada caafimaad aan si fudud loo heli karin ama haddii macluumaadka lagu kaydiyay meel ka baxsan xarunta).

### Codsashada In Isbeddel Lagu Sameeyo Xogtaada Caafimaad

Waxaad qoraal ahaan u codsan kartaa in sixitaan ama wax ka beddel lagu sameeyo macluumaadkaaga caafimaad haddii aad isleedahay xogtaada caafimaad waa qaldan tahay ama ma dhammeystirna. Waajib naguma aha in aanu aqbalno codsigaaga illaa iyadoo sharciga ku habboon na farayo maahane. Marnaba masixi doonno ama si kale uma tirtiri doonno dukumiintiyada asalka ah ee ku jira xogtaada caafimaad, ilaa iyadoo si waafaqsan xeerka gobolka ee ku habboon loogu codsado maahane. Tilmaamaha sida loo sameeyo codsiga wax ka beddelka ama sixitaanka xogtaada caafimaad waxa laga heli karaa dhammaadka Ogeysiiskan.

### Codsiga Warbixinta Shaacinta Xogtaada Caafimaadka

Waxaad qoraal ahaan ku codsan kartaa in lagaaga warbixiyo noocyo ka mid ah shaacintii lagu sameeyay xogtaada caafimaad lixdii sano ee ka horreeyay codsigaaga. Sharcigu wuxuu warbixintan ka reebayaa qaar badan oo ka mid ah shaacinnada caadiga ah, sida kuwa loo sameeyay daryeelkaaga dartiis, bixinta kharashka adeegyadaada caafimaad, ama marka aad bixisay oggolaansho qoraal ah oo ku tacaluqa shaacintaas.

Si aad u codsato in warbixin lagaa siiyo shaacintaas, eeg macluumaadka xiriirka ee hoose. Guud ahaan, codsigaaga waxaanu kaga soo jawaabi doonaa 60 maalmood gudahood ka dib markaan helno codsigaaga illaa annagoo u baahanna waqti dheeraada maahane. Waxaad xaq u leedahay hal warbixineed sannadkiiba.

## MASUULIYADAYADA LA XIRIIRTA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA

### Ogeysiiska Ka Dib Marka La Jabsado Nidaamka Xafidista Xogta Caafimaadka ee Ilaashan

Waxaa sharcigu nagu waajibinayaa inaan ku ogeysiinno haddii xogtaada caafimaad ay qayb ka noqoto jebin amni xogeed oo nagu dhacday, taas oo laga yaabo inay khatar gelisay qarsoodiga ama nabadgelyada xogtaada caafimaad.

### Helista Ogeysiiska Habraacyadeena Asturnaanta

Waxaa sharcigu nagu waajibinayaa inaan ku siinno Ogeysiiskeenna si aan kuugu sharaxno oo kuugu wargelino Habraacyadeena Asturnaanta. Xitaa haddii aad Ogeysiiskan u codsatay qaab elegtarooni ah, waxaad codsan kartaa nuqul waraaq ah markasta. Waxaad sidoo kale ku arki kartaa ama ka heli kartaa nuqul Ogeysiiskan ah

websaydkeena: BJC.org/patients-visitors/patient-privacy, SaintLukesKC.org/patients-visitors/patient-privacy, and physicians.washu.edu/for-patients/for-your-protection/.

## CABASHOOYINKA

Waan soo dhoweynaynaa fursad kasta oo aan wax uga qaban karno walaacyada aad ka qabto asturnaanta xogtaada caafimaad. Haddii aad aaminsan tahay in lagu xadgudbay ilaalinta asturnaanta xogtaada caafimaad, waxaad cabasho u gudbin kartaa shakhsiyaadka ku qoran Qaybta Xogta Xiriirka ee Ogeysiiskan. Waxaad sidoo kale cabasho u soo gudbin kartaa Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah (Office for Civil Rights) Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegga Dadweynaha ee Maraykanka (U.S. Department of Health and Human Services), adigoo warqad u diraya 200 Independence Avenue, SW, Washington, DC 20201, wacaya 877-696-6775, ama booqanaya hhs.gov/hipaa/filing-a-complaint/index.html.

Kaagama aargoosan doono inaad cabasho nagu saabsan u gudbisay Xafiiska Xaquuqaha Madaniga ah.

*Taariikhda Dhaqangalka: Febraayo 16, 2026*

## MACLUUMAADKA XIRIIRKA

Waa muhiim in la ogaado in codsiyada ama cabashooyinka ay tahay in loo gudbiyo isbitaalka ama xafiiska uu ka dhashay walaacaaga dhanka asturnaanta xogta. Codsiyada ama cabashooyinka loo gudbiyo hal bixiye adeeg loo aqoonsan maayo inay u gudbiyeen bixiyeyaasha kale ee uu daboolayo ama ku xusan Ogeysiiska Wadajirka ah.

### Xogta Xiriirka ee Xarumaha, Isbitaalada, iyo Bixiyayaasha La Xulafada ah BJC Health:

• Si aad u weydiiso su’aalo ku saabsan Ogeysiiskan, si aad u soo sheegto walaacyada ku saabsan Habraacyadeena Asturnaanta xogta, ama aad u gudbiso cabasho ku saabsan Habraacyadeena Asturnaanta ee isbitaallada iyo bixiyeyaasha BJC Health xulafada la ah, fadlan ula xiriir Sarkaalka Asturnaanta Xogta mid kasta oo ka mid ah hababka hoos ku qoran:

**Sarkaalka Asturnaanta Xogta — BJC Health**
4901 Forest Park Ave., Suite 1140
Mailstop: 90-75-571
St. Louis, MO 63108
314-362-4855
Iimayl: compliance@bjc.org

### BJC HealthCare:

• **Si aad u eegto ama uga hesho nuqul xogtaada caafimaadka** ah isbitaalka ama bixiyaha adeegga ee BJC HealthCare xulafada la ah, waxaad kala xiriiri kartaa lambarka 314-362-3935 ama booqo BJC.org oo la xiriir waaxda diiwaanka caafimaadka ee xarunta lagu hayo xogtaada caafimaadka.

• **Si aad u codsato wax ka beddelis ama sixitaanka xogtaada caafimaadka** ee ay hayaan isbitaalada iyo bixiyayaasha BJC HealthCare la xulafada ah, fadlan iimayl u dir enterprise_mpi_maintenance@bjc.org ama wac 314-273-2468.

• **Si aad u codsato in la xannibo isticmaalka xogtaada caafimaadka** ee ay hayaan isbitaalada iyo bixiyayaasha BJC HealthCare la xulafada ah, fadlan iimayl u dir HIM_DMOPS_ROI@bjc.org.

• **Si aad u codsato warbixinta shaacinta xogtaada** ee ay sameeyeen isbitaalada iyo bixiyayaasha BJC HealthCare la xulafada ah, fadlan iimayl u dir disclosure_management_legal@bjc.org ama wac 314-454-4997.

### Saint Luke’s:

• **Si aad u eegto ama uga hesho nuqul xogtaada caafimaadka** ee ay hayaan isbitaalada iyo bixiyayaasha Saint Luke’s la xulafada ah, fadlan iimayl u dir roi@saint-lukes.org, ama booqo saintlukeskc.org/medical-records.

• **Si aad u codsato wax ka beddelis ama sixitaanka xogtaada caafimaadka** ee ay hayaan isbitaalada iyo bixiyayaasha Saint Luke's la xulafada ah, fadlan buuxi oo gudbi foomka ku jira saintlukeskc.org/medical-records oo iimayl ahaan ugu soo gudbi cinwaanka amendments@saintlukeskc.org.

• Si aad u codsato in la xannibo isticmaalka xogtaada c**aafimaadka** ee ay hayaan isbitaalada iyo bixiyayaasha Saint Luke's la xulafada ah, fadlan Diiwanada Caafimaadka kala xiriir iimaylka roi@saint-lukes.org.

• **Si aad u codsato warbixinta shaacinta xogtaada** ee ay hayaan isbitaalada iyo bixiyayaasha Saint Luke's la xulafada ah, fadlan Diiwanada Caafimaadka kala xiriir roi@saint-lukes.org.

## Macluumaadka Xiriirka ee Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington ama Bixiyayaasheeda:

• Wixii su'aalo ah oo ku saabsan Ogeysiiskan, walaacyada ku saabsan Habraacyadayada Asturnaanta ah, ama si aad u gudbiso cabasho ku saabsan Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington ama bixiyeyaasha adeegyadeeda, waxaad kala xiriiri kartaa Sarkaalka Asturnaanta adigoo adeegsanaya mid kasta oo ka mid ah hababka hoos ku xusan:

**Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington — Sarkaalka Asturnaanta**
660 S. Euclid Ave.
MSC 8095-02-01
St. Louis, MO 63110
866-747-4975
Iimayl: HIPAA@wustl.edu

• **Si aad u eegto ama uga hesho nuqul xogtaada caafimaadka** ay hayaan bixiyaha Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington,fadlan raac tilmaamaha ku qoran physicians.washu.edu/for-patients/medical-records-request/. Waxaad sidoo kale Adeeg Siidaynta Xogta Caafimaad ee Jaamacadda Washington kala xiriiri kartaa lambarka 314-273-0453.

• **Si aad u codsato wax ka beddelis ama sixitaanka xogtaada caafimaadka** ee ay hayaan bixiyaha Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington, fadlan raac tilmaamaha ku jira physicians.washu.edu/for-patients/medical-records-request/ ama waaxda Maamulka Xogta Caafimaadka ee Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington iimayl ahaan kula xiriir HIM@wustl.edu ama taleefan ahaan lambarka 314-273-1986.

• **Si aad u codsato in la xannibo isticmaalka xogtaada** ee uu hayo bixiyaha Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington, fadlan Xafiiska Asturnaanta Xogta ee Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington HIPAA kala xiriir lambarka 866-747-4975 ama iimaylka HIPAA@wustl.edu.

• **Si aad u codsato warbixinta shaacinta xogtaada** ee uu shaaciyay bixiyaha Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington, fadlan Xafiiska Asturnaanta Xogta ee Kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Washington HIPAA kala xiriir lambarka 866-747-4975 ama iimaylka HIPAA@wustl.edu.

HAY'ADAHA UU OGEYSIISKANI KHUSEEYO WAXAA LAGA HELI KARAA XIRIIRKA SOO SOCDA:

BJC.org/patients-visitors/patient-privacy